

1

Siyaabaha kale ee lagu Xallin karo Khilaafaadka iyo Xeerka Qoyska wuxu ka qabo

SOM 001

XEERKA QOYSKA IYO DUMARKA DEGGAN ONTARIO



Dumarka oo dhan.
Hal Sharci oo Xeerka Qoyska ah.
Ogoow xuquuqdaada.

flew Family Law
Education for Women
Women's Right to Know

fodf Femmes ontariennes et
droit de la famille
Le droit de savoir

Siyaabaha kale ee lagu Xallin karo Khilaafaadka iyo Xeerka Qoyska wuxu ka qabo

Buugan yar waxaa loogu tala galay in lagu siiyo warbixin gaaban oo ku saabsan arrimaha khuseeyo sharciga. Xogtan ma lagu beedeli karo xogta gaarka ah iyo caawinaada qofka loo fidiyey oo sharciga ku saabsan. Haddii arrintaada ay khuseyso sharciga xeerka qoyska, raadso la talin sharci ah sida ugu dhaqsiyaha badan si xaqaada aad u dhacsato. Xogwarran dheeraad ah ee ku saabsan sida aad u heli lahayd qareenka arrimaha xeerka qoyska, lagacna aad u siin lahayd, ka fiiriso buugeena yar oo ku magacaaban "sida aad u heli lahayd cid kaa caawinta dhibaataada xeerka qoyska" oo ku qoran shabakadda www.onefamilylaw.ca.

Haddii adiga iyo saygaada aad kala tagtaan, waxaa ku soo food saari doono arrimo badan oo qaanuuni ah. Waxaa ka mid ah, isku afgarashada kharashka reerka, isku afgarashada danaha caruurta iyo isku afgarashada sida aad u kala qeybsan lahaydeen hantida reerka. Maxkamadda ayaad tagi kartaa si go'aan looga gaaro arrimahan. Labadiina ayaa xal isla gaari kara ama waxaad adegsan kartaa **Siyaabaha kale ee lagu Xallin karo Khilaafaadka (ADR)**.

Si aad u xalliso khilaafka ha isticmaalin habka ADR haddii uu qofka kale yahay ruux rabshoole ah ama ku xadgudub badan. Ha u isticmaalin habkan ruux horey isugu dayey in uu kugu amar taagleeyo ama ruux kaa awood roon.

Waa maxay habka Siyaabaha kale ee lagu Xallin karo Khilaafaadka ADR?

Siyaabahan kale ee lagu xallin karo khilaafaadka, ama habka loo yaqaan ADR, waa hab rasmi ah ee dadku ku xallistaan khilaafkooda. Dadka wey kala wada xaajoodi karaan, ama ruux kale ayaa dhex-dhexaadiyo, ama u kala gaar qaado. Hishiisii, dhex-dhexaadin, iyo u kala gar qaadid waxay ka mid yihiin noocyada ADR. Ma lagugu khasbi karo isticmaalka habka ADR haddii arrintu ay khusayso xeerka qoyska. Adiga iyo saygaadii hore waa in aad go'aanka si xor ah u gaartaan.

Haddii aad damacsantahay in aad isticmaasho habka ADR, had iyo jeer la tasho qareen. Haddii aadan la tashan waxaa dhici kara in aad ka takto xaq aad leedahay oo aadan ogeyn.

Goormee ayaad isticmaali kartaa ADR:

Arrimaha xeerka qoyska qaarkood, waxay ku haboonyihiin in la isticmaalo habka ADR inta la tagi lahaa maxkamadda. Sababtu waxay tahay habkan:

- adiga ayaa awood badan ku leh sida ay arrintaada u socoto
- waad dooran kartaa nooca arrintaada loo xallin karo
- waa ka dhaqsiyo badantahay, waana ka kharash yartahay xalka maxkamadda
- waana ka murugo yartahay xalka maxkamadda

Adiga iyo saygaadii horeba waxaa idiin sahlan in aad arrintiina ku dhameysataan habka ADR, haddii ay qalbi furnaan iyo daacadnimo idinka dhaxeeyso, xiriirkiinana uu dhamaado. Ruux qareen ah ha idinka caawiyo haddii ay suuro galtahay.

Laakiin, khilaaf kasta kuma haboona habka ADR. Habka ADR kuma haboona haddii:

- ay kulatahay in saygaada uusan ku dhageysaneynin ama ku xismeyneynin
- aadan la hadli karin
- adiga iyo saygaada aysan wada-shaqeyn idin dhex-mari karin
- saygaada uu ahaa qof xadgudub ama rabsho badan
- saygaada uu horey isugu dayey in uu kugu amar taagleeyo ama ku handado
- saygaada uu kaa faa'ideysan karo
- saygaada uu kaa awood badanyahay

Immisa nooc ayuu u kala baxaa habka ADR?

Habka ADR wuxuu u kala baxaa affar nooc oo kala duwan oo intaba ku saleysan xeerka qoyska si loo xalliyo khilaafka reerka. Waxay kala yihiin: hishiis, dhex-dhexaadin, u kala gar qaadid iyo ku wada shaqeynta xeerka qoyska.

1. Wada-hadal

Wada-hadal waa arrin aad u sahlan. Adiga iyo sayigaadii hore si toos ah ayaad u wada hadleysaan ilaa inta aad go'aan ka wada gaartaan Toos ayaad u wada hadli kartaan, ama qareeno idiin shaqeeyo ayaa idiin kala dab qaadi karo. Mararka qaar waxaa dhaca ruux in uu qareen la yimaado ruuxa kalena uusan la imaanin. Qareenada badankood wada-hadal ayey ku deyaan arrinta inta aysan maxkamadda u gudbinin.

Hishiisiinta waxay ku saleysantahay wada hadal. Kolka la hishiio, hubi in la qoro go'aanka lagu hishiiyey kaddibna wada saxiixa labadiinaba. Hishiiska haddii uusan ahayn mid qoraal ah way dhib badnaaneysaa sida loo hirgeliyo.

2. Dhex-dhexaadin

Ruux **dhex-dhexaadiye** ah ayaa sahlinaayo wada hadalka labada qof si ay go'aan u wada gaaraan. Dhex-dhexaadiyaha waa ruux garanaayo habka loo kala dhex galo khilaafka. Badanaa waa ruuxa bulshada u adeega, takhtarka cilmi nafsiga bartay ama ruux qareen ah.

Dhex-dhexaadiyaha waa in uu ahaado daacad. Uma eexan karaan midkiina inta uu xilka gudanaayo. Wuu ku talo bixin karaa xalka meesha uu ku jiro, laakin kuma qasbanid in aad ku raacdo taladiisa. Dhex-dhexaadiyaha ma bixin karo talo sharci ah.

Waa in aad latashadaa qareen inta aadan ka qeyb galin dhex-dhexaadinta. Qareenka wuxuu kuu fasiri karaa xuquuqda aad leedahay iyo waajibaadka ku saaran, laakiin badanaa, kuuma soo raaci karo gogosha dhex-dhexaadinta.

Haddii aysan ku qancin dhex-dhexaadinta waad ka dhaqaaqi kartaa, sidaas ayaana lagu kala tagayaa. Haddii aad labadiina go'aan isla meel marin waysaan, dhex-dhexaadinta waa lagu kala tagayaa. Kaddib waxaa kuu banaan in aad nooc kale oo ADR ah aad tijaabiso ama aad maxkamadda tagto. Haddii aad go'aan isla gaartaan, ha saxiixin go'aankaas asaga ah ilaa uu akhriyo qareenkaada.

Dhex-dhexaadinta waa lagac la'aan. Xarumaha maxkamadaha xeerka qoyska ee ku yaalo Ontario oo idil waad ka heli kartaa ruux dhex-dhexaadiye ah. Haddii aad awoodi kartid waad shaqaaleysan kartaa dhex-dhexaadiye kuu gaar ah. Sidoo kale, haddii aad rabtid latalin sharci ah, waa in aad lacag la baxdaa oo aad qareen kireysato.

3. Gar qaadid

U kala gar qaadidda, adiga iyo saygaadii hore waxaad shaqaleysineysiin ruux saddexaad si uu idiinku kala gar naqo. Qofkan saddexaad waxaa lagu magacaabaa **garsoore**. Garsooraha ma idin kala furi karo mana nasakhi karo guurkiina, laakiin wuxuu go'aamin karaa ruuxa caruurta haynayo, kharashka reerka, xiriirka caruurta iyo sida loo kala qeybsan lahaa hantida reerka. Garsooreyaasha waxay go'aan ka gaari karaan wixii aad ka codsataan oo keli ah. Garsooreyaasha waa in ay go'aankooda ku saleeyaan sharciga xeerka qoyska ee Kanada ama kan gobolka Ontario u degsan.

Haddii aadan aqoon xaqqa uu sharciga Kanada kuu ogolyahay, weydii ruux qareen ah. Mar haddii la bilaabo gar qaadidda, kama noqon kartid. Waa in aad u hogaansanaato go'aanka garsooreyaasha. Habkan u kala gar qaadidda ah waa qaali maxaa yeelay waa in aad qareen shaqaaleysaa. Waxaad kaloo aad bixineysaa lacagta garsooraha. Xilliga garta la qaadayo haddii aadan la imaan qareen, waa in aad caddeysaa in aad horey ula soo tashatay ruux qareen ah inta aadan u fariisanin garta.

Xusuuso, gar qaadid iyo dhex-dhexaadin waa kala nooc. Dhex-dhexaadinta waxaad leedahay ikhtiyaar. Goor kasta ayaad ka tagi kartaa goobta ama aad diidi kartaa fikirka saygaadii hore soo jeediyey ama talada uu ruuxa dhex-dhexaadiye idiin kala ah soo jeediyo. Habka gar qaadidda adiga ikhtiyaar ma lihid. Waa in aad u hogaansanaataa go'aanka garsooraha, haddii uu sharciga waafaqsan yahay.

4. Ku Wada Shaqeynta Sharciga Xeerka Qoyska

Ku wada shaqeynta sharciga xeerka qoyska waa hab cusub oo ka mid ah noocyada ADR. Adiga, saygaadii hore iyo qareenadiinaba waa in aad wada xallisaan khilaafkiina. Waa hab qareenada xitaa ku cusub. Maxkamadda kolka la joogo, qareenada waxay u doodaan xuquuqda qofka? u ah oo keli ah oo ma eegaan qofka kale dhibkiisa.

Ku wada shaqeynta sharciga xeerka qoyska waa hab deg degsiyo badan kana raqiisan gar qaadidda maxkamadda. Aad buuna uga fududyahay kan maxkamadda. Laakiin ma ahan mid dadka oo idil u fiican. Habkan wuxuu suuroobayaa kolka ay labada qof is xushmaynayaan kana shaqeynayaan sida ay u xallin lahaayeen khilaafkooda. Isticmaalka habkan wuxuu u sahlanyahay dadka awoodi kara in ay shaqaaleeyaan qareen.

Mararka qaarkood, go'aan fiican ma wada gaaraan dadka isticmaala habkan ku wada shaqeynta sharciga xeerka qoyska ah. Haddii ay taasi dhacdo, waa in aad qareen cusub shaqaaleysaa si uu kuugu doodo marka maxkamadda la tago.

Habkan ku wada shaqeynta sharciga qoyska wuxuu noqon karaa mid kharash badan maxaa yeelay waa in aad qareen shaqaaleysaa. Qiimaha wuxuu ku xiran yahay inta aad kula hishiiso qareenkaada. Hay'adda "Legal Aid" ka ma bixindoonto kharashka qareenka ku caawinaayo. Haddii wada hadalka uu miro dhali waayo, waa in aad haddana qareen cusub shaqaaleyso si uu kuugu doodo marka maxkamadda la tago.

Haddii aad tahay qof dumar ah oo ku hadasho luqadda fransiiska oo ku nool gobolka Ontario, waxaad xaq u leedahay in laguugu adeego luqadda Fransiiska kolka ay maxkamadda xallineyso arrimaha xeerka qoyskaada. Xogwarran dheeraad ah ee ku saabsan xuquuqdaada, kala xiriir ruux qareen ah, xarumaha adeega arrimaha sharciga khuseeya, ama khadka taakuleynta Femaide 1-877-336-2433, TTY 1-866-860-7082.

Xogwarran dheeraad ah oo ku saabsan sida aad ku heli lahayd adeega luqadda Fransiiska ah ka fiiri shabakadda www.onefamilylaw.ca ama www.undroitdefamille.ca.

Mawduucyada Xeerka Qoyska oo diyaarka ah:*

1. Siyaabaha kale ee lagu Xallin karo Khilaafaadka iyo Xeerka Qoyska wuxu ka qabo (SOM 001)
2. Badbaadada Caruurta iyo Xeerka Qoyska (SOM 002)
3. Masruufka Caruurta (SOM 003)
4. Xeerka qoyska iyo kan Dambiyada (SOM 004)
5. Xannaanaynta iyo ka Warqabka Caruurta (SOM 005)
6. Heshiisyada Qoyska (SOM 006)
7. Gar-qaadida Xeerka Qoyska (SOM 007)
8. Xeerka Qoyska sida uu u quseeyo dumarka Soo galootiga ah, kuwa Qaxooyiga ah iyo kuwa aan Sharciga lahayn (SOM 008)
9. Sidii aad u heli lahayd cid kaa caawinta dhibaataada xeerka qoyska (SOM 009)
10. Sharciga Xeerka Qoyska sida uu u Qaybiyo Hantida reerka (SOM 010)
11. Guurka iyo furidda (SOM 011)
12. Masruufka Sayga (SOM 012)

** Buugan waxaa la heli karaa asagoo noocyo kale ah ama luqado kale ku qoran. Fadlan eeg shabakadda www.onefamilylaw.ca si aad u hesho warbixin dheeraad ah. Websaaydkeena waxaad kaloo ka heleysaa buugag badan oo kaa caawinaayo sida aad u aqoonsan lahayd xaqaada ku qoran sharciga xeerka qoyska.*



flew Family Law
Education for Women
Women's Right to Know

fodf Femmes ontariennes et
droit de la famille
Le droit de savoir

Funded by: / Financé par:
 Ontario

Xogwarranka ku qoran qoraaladan waa aragtida hay'adda FLEW
sidaa darteed dowladda Gobolka mas'uul kama ahan nuxurka qoraaladan.